

## WAR SAXAAFADEED

### Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee Dawladda Puntland iyo UNICEF oo Daah-furay Hannaan Teknoolajiyad cusub ah oo Ardaydu wax uga Barayaan Internetka

*Haddii dugsiyadu xirmaan, hannaanka **Learning Passport** wuxuu ardayda u suurtagelinayaa inay waxbrashadii sii wataan iyagoo guryaha jooga*

**Garoowe, Puntland State of Somalia** 20 July 2020. Ka dib markii mashaqada Covid-19 ay sababtay in dhammaanba dugsiyadii xidhmaan, UNICEF and Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed waxay daah-fureen hannaankaan lagu magacaabo 'Learning Passport' oo ah hab ardayda u suurtagelinaya inay casharradii iyo maaddooyinkii ay baranayeen oo diyaarsan ay si sahlan uga baran karaan aaladda internetka iyagoo guryahooda jooga. Hannaanka "Learning Passport" waa curin dariiq cusub oo ay iska kaashadeen UNICEF, Microsoft iyo Jaamacadda Cambridge.

Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare, Mudane, Cabdullaahi Maxamed Xassan ayaa sheegay in Puntland tahay ciddii ugu horeysey qaaradda Africa ee adeegsata hannaankan cusub ee Learning Passport. Wasiir Cabdullahi ayaa yiri: "aradaydu waxay fursad u helayaan in helaan casharro tayo sare leh oo u dhigma ama la heer ah manhajka iyo muqarrarka dalka, taasoo looga gol leeyahay in wax barashada caruurta Puntland aysan u garbo-duubnaan dhibaataada cudurka Covid-19 ee xirista dugsiyada".

Marxaladdaan bilowga ah ee hannaanka LP waxuu in ka badan 11,000 oo arday, oo ku dhawaad kala-bar gabdho yihiin, fursad u siiyay in ay casharrada fasallada 8aad iyo 12aad oo ka kooban 30 maaddo iyo saddex luqadood oo muuqaal ah ku qaataan kombuyuutar ama moobeyl. Waxaa gacanta lagu hayaa diyaarinta duubista casharrada dhammaan fasallada ka dhiman dugsiyada hoose iyo sare kuwaas oo markii la dhameeyo la soo galin doono LP si ay ardaydu wax ugu bartaan hannaankaan casriga ah ee ka hanaqaaday Puntland.

Macallimiintu waxay awood u yeelanayaan in ay la socdaan waxbarashada ardayda si ay u qiimeeyaan horumarkooda. Sidoo kale, waxaa ayana awood u yeelan doona la socoshada waxbarashada ubadka waaliddiinta oo heli doona fursad ay ku saacidaan ubadkooda. Hannaan LP waxa uu gacan weyn ka gaysan doonaa sare u qaadista miraha waxbarashada.

"Learning Passport waa isbaddal sameeye dhab ah markii ay timaaddo waxbarashada meeldheer laga la socdo," sidaas waxaa tiri Phuong T. Nguyen oo madaxa qaybta waxbarashada Soomaaliya ee hay'adda UNICEF. Waxay, Phuong T. Nguyen oo hadalkeeda sii wadata ku dartay "xilliyada ay jiraan xaaladaha deg degga ah sida tan oo kale, waa muhiim in ubadku sii wataan waxbarashadooda si ay u dareemaan xasillooni iyo kalsooni. Haddii COVID-19 uu sababay in la xiro iskuulladii, ma ahan in waxbarashadu gabi ahaanba istaago. Waa in aan ka faa'iidayanna teknoolojiyadda si ay ubadku u sii wataan waxbarashadooda."

Markii iskuulladu dib u furmaan, Learning Passport waa uu joogi doonaa waxuuna ardayda u kabi doonaa casharradooda ay ka soo qaataan fasalka. Sidoo kale, Learning Passport waxuu si gaar ah u caawin doonaa ubadka nugul ee ku nool xeryaha barakacayaasha kuwaas oo aan helin fursado waxbarasho.

Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee Puntland waxay noqonaysaa tii ugu horraysay ee Qaaradda Afrika qaadatay hannaanka Learning Passport. Waxaan hoggaanka wasaaradda ugu hambalyaynaynaa inay ka go'an tahay gaarsiinta waxbarashada ubadka reer Puntland oo dhan.

#####

## UNICEF

UNICEF waxay ka hawl-gashaa meelo/dalal badan oo adduunka ah oo ay ka jiran xaalad-nololeedyo qallafsan si ay u caawinto caruurta, gaar ahaan kuwa nugul iyo kuwa la nool duruufaha gaarka ah. Dhamaan 190ka dal ee UNICEF ay ka hawl-gasho, waxan u adeegnaa ilmo kastoo ilmahaasu ku nool yahayba, si loo xaqiijiyo duni ku habboon in aadanahu si wanaagsaan ugu wada noolaado. Ciddii rabta xog iyo faah faahin dheerad ah oo ku saabsan UNICEF hawlaha ay u xil-saaran tahay, booqo cinwaanka [www.unicef.org](http://www.unicef.org)

### **Wixii faah-faahin intaas dheer, fadlan la xiriir**

Eva Hinds, UNICEF Somalia, [ehinds@unicef.org](mailto:ehinds@unicef.org), +252 613642635